

**XAASHIDA XAQIIQDA MACLUUMAADKA TALLAALKA EE LOOGU
TALAGALAY DADKA DARYEELKA LA SIIYO IYO DARYEEL
BIXIYEYAASHA**

**KU SAABSAN SPIKEVAX (TALLAALKA COVID-19, mRNA), TALLAALKA
MODERNA EE COVID-19, IYO TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, BIVALENT
(TALLAALKA ASALKA AH IYO OMICRON BA.4/BA.5) SI LOOGA HORTAGO
CUDURKA CORONAVIRUS 2019 (COVID-19)**

**DADKA DA'DOODU TAHAY 6
SANO JIR IYO KA WAYN**

Waxaa adiga iyo ilmahaaga la idiin soo bandhigayaa Tallaalka SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA), Tallaalka Moderna ee COVID-19, ama Tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent (Tallaalka Asalka ah iyo Omicron BA.4/BA.5), halkan wixii ka dambeeya loogu yeeri doono Tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent, si looga hortago Cudurka Coronavirus 2019 (COVID-19) ee uu keeno caabuqa SARS-CoV-2.

Xaanshida Xaqiiqda ee Macluumaadka Tallaalka ee Dadka Adeegga Qaata iyo Daryeel Bixiyeyaasha waxay ka kooban tahay Xaanshida Xaqiiqda ee Tallaalka Moderna ee COVID-19 ee la oggolaaday iyo tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent ee la oggolaaday si loo siiyo shakhsiyadka da'doodu tahay 6 sanno iyo wixii ka weyn, oo sidoo kale waxaa ku jira macluumaad ku saabsan tallaalka FDA ay shatiga u gooyeen, SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA) si loo siiyo shakhsiyadka da'doodu tahay 12 sanno iyo wixii ka weyn.¹

Tallaalka SPIKEVAX ee FDA ansixiyeen (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo Tallaalka Moderna ee COVID-19 ee lagu oggolaaday Oggolaanshaha U Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah (EUA) ee loogu talagalay shakhsiyadka da'doodu tahay 12 sanno iyo ka weyn ayaa la isku beddeli karaa, marka loo isticmaalo si waafaqsan tilmaamahooda u gaarka ah ee isticmaalka.²

Tallaalka SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA) waa tallaalka COVID-19 ee FDA ay oggolaatay oo ay samaysay shirkadda ModernaTX, Inc. Waxaa loo ansixiyay in loo adeegsado laba garoojo oo isxigxiga ahaan oo loogu talagalay kahortagga COVID-19 ee shaqsiyaadka da'doodu tahay 18 sanno iyo wixii ka weyn. Sidoo kale waxa loo oggolaaday Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah (EUA) si loo siiyo:

- laba garoojo oo isxigxiga oo aasaasi ah oo loogu talagalay shakhsiyadka da'doodu tahay 12 sanno ilaa 17 sanno; iyo
- garoojada saddexaad ee tallaalka aasaasiga ah ee shakhsiyadka da'doodu tahay 12 sanno iyo wixii ka weyn kuwaasoo la go'aamiyey inay qabaan noocyo ka mid ah difaaca hoos u dhacay.

¹ Waxaa dhici karta inaad hesho Xaanshida Xaqiiqda xitaa haddii ilmahaagu yahay 5 sano jir. Carruurta da'doodu ka gudbayso 5 sanno una gudbayso 6 sanno inta udhaxeysa garoojooyinka tallaalka isxigxiga ee aasaasiga ah ayaa heli doonaan, garoojo kasta oo ka mid ah tallaalka

isxigxiga ee aasaasiga ah, midkood: (1) Tallaalka Moderna ee COVID-19 ee la oggolaaday si loo siiyo shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 bilood ilaa 5 sanno; ama (2) Tallaalka Moderna COVID-19 ee la oggolaaday si loo siiyo shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 sanno ilaa 11 sano.

Carruurta da'doodu ka gudbayso 11 sanno una gudbayso 12 sanno inta u dhaxeysa garoojooyinka tallaalka isxigxiga ee aasaasiga ah ayaa heli doonaan, garoojo kasta oo ka mid ah tallaalka isxigxiga ee aasaasiga ah, midkood: (1) Tallaalka Moderna ee COVID-19 ee la oggolaaday si loo siiyo shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 sanno ilaa 11 sanno; ama (2) Tallaalka Moderna COVID-19 ee la oggolaaday si loo siiyo shakhsiyaadka da'doodu tahay 12 sanno iyo wixii ka weyn; ama (3) SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA).

² Tallaalka FDA ay ansixiyeen ee SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo hal qaadasho oo Tallaalka Moderna ee COVID-19 ee EUA lagu oggolaaday (lagu keeno dhallooyin leh fur cas iyo dhegaatiyo leh soohdin buluug ah oo khafiif ah) ayaa la isku beddeli karaa si loogu isticmaalo tallaalka isxigxiga ee aasaasiga ah ee loogu talagalay shakhsiyaadka da'doodu tahay 12 sanno iyo ka weyn iyadoo aysan jirin wax walaacyo badqab ama wax-ku-oolnimo ah.

Tallaalka Moderna ee COVID-19 ayaa EUA kahelay FDA si loo bixiyo:

- **laba garoojo oo isxigiga oo aasaasi ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 sanno iyo ka weyn; iyo**
- **garoojo taxane ah oo aasaasi ah oo saddexaad dadka da'doodu tahay 6 iyo wixii ka wayn ee leh noocyo gaar ah oo liidashada difaaca ah.**

Tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent ayaa EUA kahelay FDA si loo bixiyo midkood:

- **hal garoojo oo xoojiye ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 jir ama ka weyn ugu yaraan 2 bilood kadib marka laga qaato tallaalka aasaasiga ah mid kasta oo ka mid ah tallaalka koowaad ee la ansixiyay ama la oggolaaday ee monovalent³ ee COVID-19; ama**
- **hal garoojo oo xoojiye ah oo loogu talagalay shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 jir ama ka weyn ugu yaraan 2 bilood kadib marka laga qaato garoojada xoojinta ah ee ugu dambaysay mid kasta oo ka mid ah tallaalka la oggolaaday ama la ansixiyey ee monovalent ee COVID-19.**

Xaanshidaan Xaqiiqda ee Macluumaadka Tallaalka waxaa ku jira macluumaad kaa caawinaya inaad fahamto khataraha iyo faa'iidooyinka tallaalka SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA), Tallaalka Moderna ee COVID-19, iyo Tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent, kuwaas oo aad heli kartaan adiga ama ilmahaagu maadaama hadda uu jiro safmarka COVID-19. Lahadal bixiyaha tallaalka haddii aad qabto su'aalo.

SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA), Tallaalka Moderna ee COVID-19, iyo Tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent ma difaaci karaan qof walba.

Xaanshidaan Xaqiiqda waxaa laga yaabaa in la cusbooneysiisay. Xaashida Xaqiiqda ee ugu dambaysay haddii aad dooneyso, fadlan booqo www.modernatx.com/covid19vaccine-eua.

WAXAY TAHAY INAAD OGAATO KAHOR INTA ADIGA AMA ILMAHAAGU UUSAN QAADAN TALLAALKAN

WAA MAXAY COVID-19?

COVID-19 — waxaa sababa fayraska corona ee lagu magacaabo SARS-CoV-2. Noocaan coronavirus-ka ah horay looma arag. Waxaad ka qaadi kartaa COVID-19 taabashada qof kale oo qaba fayraska. Badi waa xanuun neef mareenka ku dhaca laakiin sidoo kale saamayn kara xubnaha kale. Dadka qaba COVID-19 waxay yeeshaan astaamo badan sida lasoo tebiyo, kuwaasi oo ka bilaabma astaamo fudud ilaa jirrooyin daran. Astaamuhu waxay soo bixi karaan 2-14 maalmood kadib markaad u baylahdo fayraska. Kuwaan waxaa ku jira: qandho ama qarqaryo; qufac; neefta oo kugu yar; daal; murqo ama jir xannuun, madax xanuun; lumida cusub ee dhadhanka ama urta; cune xanuun; calool istaag ama sanko oo diif ka dareerayo; lallabo ama mantag; shuban.

MAXAA XIRIIR AH OO KA DHEXEYEA SPIKEVAX (TALLAALKA COVID-19, mRNA), TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, IYO TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, BIVALENT?

³ Monovalent waxaa loo yaqaan tallaalka kasta oo COVID-19 uu leeyahay oo la oggolaaday ama la ansixiyey oo uu ku jiro ama soo saara spike protein-ka Original SARS-CoV-2 oo kaliya.

⁴ Tallaalka FDA ay ansixiyeen ee SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo hal qaadasho oo Tallaalka Moderna ee COVID-19 ee EUA lagu oggolaaday ah (lagu keeno dhallooyin leh fur cas iyo dhegaatiyo leh soohdin buluug ah oo khafiif ah) ayaa la isku beddeli karaa si loogu isticmaalo tallaalka isxigxiga ee aasaasiga ah ee loogu talagalay shakhsiyaadka da'doodu tahay 12 sanno iyo wixii ka weyn iyadoo aysan jirin wax walaacyo badqab ama wax-ku-oolnimo ah.

SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo Tallaalka COVID-19 ee Moderna waa la isku baddali karaa.⁴ Tallaalka Moderna COVID-19, Bivalent waxaa loo sameeyay si la mid ah sida SPIKEVAX iyo Tallaalka Moderna COVID-19, balse wuxuu sidoo kale ka kooban yahay qayb tallaalka Omicron ah si ay taasi gacan uga geysato kahortagga COVID-19 ee ay keenaan noocyada caabuqa ee Omicron ee SARS-CoV-2.

Si aad u hesho xog badan oo ku saabsan EUA, eeg “**Waa maxay Ogolaanshaha Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah (EUA)?**” qeybta ah dhammaadka Xaashidaan Xaqiiqada.

WAA MAXAY WAXAAD USHEEGI LAHAYD BIXIYAHA TALLAALKA KAHOR INTA ADIGA AMA ILMAHAAGU UUSAN QAADAN TALLAALKA MID KA MID AH TALLAALADAAN?

U sheeg bixiyaha tallaalka dhammaan xaaladaha caafimaadkaaga ama caafimaadka ilmahaaga, oo ay ku jirto haddii ilmahaaga ama aad adigu:

- qabtid wax xasaasiyad ah
- qabtid bararka murqaha wadnaha ama bararka xuubka sare ee wadnaha
- qabtid qandho
- qabtid cillad dhanka dhiigbaxa ah ama aad qaadato daawo dhiigga khafiifiso
- qabtid ama ilmahaagu qabo liidasho dhanka difaaca jirka ah ama ay kuu socdaan ama ilmahaaga u socdaan daawooyin saameeya nidaamka difaaca
- uur leedahay ama aad qorshaynayso inaad uur yeelato
- naasnuijinayso
- qaadatay tallaalka COVID-19
- waligaa mar uun suuxday kadib markii cirbad lagugu duray

YAY TAHAY INUUSAN QAADAN SPIKEVAX (TALLAALKA COVID-19, mRNA), TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, IYO TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, BIVALENT?

Adiga ama ilmahaagu waa inuusan qaadan wax ka mid ah tallaaladan haddii adiga ama ilmahaagu:

- qaaday falcelin xasaasiyadeed oo daran kadib markii aad horay u qaadatay garoojada tallaalka SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA) ama Tallaalka Moderna COVID-19
- qaaday falcelin xasaasiyadeed oo daran kadib markaad qaadatay maaddo kujirta tallaaladaan

Waa maxay maaddooyinka ku jira tallaaladaan?

SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA), Tallaalka Moderna ee COVID-19, iyo Tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent waxay ka kooban yihiin maaddooyinka soo socda: aasiidka messenger ribonucleic (mRNA), dux (SM-102, polyethylene glycol [PEG] 2000 dimyristoyl glycerol [DMG], kolestarool, iyo 1,2-distearoyl-sn-glycero-3-phosphocholine [DSPC]), tromethamine, tromethamine hydrochloride, aasiidka acetic, sodium acetate trihydrate, iyo sucrose.

SIDEE LOO QAATAA TALLAALADAAN?

SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA), Tallaalka Moderna ee COVID-19, ama Tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent ayaa laga siin doonaa adiga ama ilmahaaga muruqa ayadoo Dib loo eegay: Okt/12/2022

cirbad lagula durayo.

Tixanaha Aasaasiga ah: SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo Tallaalka Moderna COVID-19 waxaa loo bixiyaa laba garoojo oo tallaal oo isxigxiga ahaan, oo ay u dhexayso 1 bil. Garoojada saddexaad ee tallaalka isxigxiga ee aasaasiga ah ayaa laga yaabaa in la bixiyo ugu yaraan 1 bil kadib garoojada labaad ee la siiyo shakhsiyaadka qaba noocyo gaar ah oo difaaca jirka ee liita.

Garoojo Xoojiye ah: Tallaalka Moderna COVID-19, La Cusbooneysiiyay ayaa loo qaataa hal garoojo oo xoojin ah ahaan ugu yaraan 2 bilood kadib:

- dhammaysiga tallaalka aasaasiga ah ee tallaal kasta oo COVID-19 monovalent ah oo la oggolaaday ama la ansixiyey; ama
- helitaanka garoojada xoojinta ah ee ugu dambeysay ee tallaal monovalent COVID-19 ah oo la oggolaaday ama la ansixiyay.

TALLAALADAN HOREY MA LOO ISTICMAALAY?

Malaayiin qof oo 18 sano jir iyo kawayn ah ayaa ku qaateen Tallaalka Moderna ee COVID-19 EUA tan iyo Diseembar 18, 2020. Tijaabooyinka caafimaad, qiyaastii 30,000 oo qof oo da'doodu tahay 12 jir iyo ka wayn, 4,000 oo qof oo da'doodu tahay 6 jir ilaa 11 jir, iyo 5,000 oo qof oo da'doodu tahay 6 bilood ilaa 5 jir ayaa qaatay ugu yaraan 1 garoojo oo ah Tallaalka COVID-19 ee Moderna.

Gudaha tijaabada caafimaad, ku dhawaad 400 oo qof oo da'doodu tahay 18 iyo kawayn ayaa qaatay 1 garoojo oo tallaalka bivalent ah kaasoo ka duwan tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent maadaama uu ka kooban yahay qayb tallaalka Omicron ah oo duwan.

WAA MAXAY FAA'IIDOOYINKA TALLAALADAAN?

SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA) iyo Tallaalka Moderna ee COVID-19 ayaa la muujiyey inuu ka hortago COVID-19. FDA waxay oggolaadeen Tallaalka Moderna COVID-19, La Cusbooneysiiyay si uu u bixiyo kahortag wanaagsan oo ka dhan ah COVID-19 oo uu sababay nooca Omicron ee SARS-CoV-2.

Mudada uu difaaci karo COVID-19 waqtigaan lama oga.

WAA MAXAY HALISTA AY LEEYIHIIN TALLAALADANI?

Waa wax aan aad u badnayn in tallaaladaan ay sababi karaan falcelin xasaasiyad daran ah. Xasaasiyadda daran waxay caadiyan dhici kartaa dhowr daqiiqo ilaa hal saacad gudahooda markii la qaato garoojada. Sababtaan darteed, bixiyaha tallaalka ayaa ku weydiisan kara adiga ama ilmahaaga inaad joogto meesha adiga ama ilmahaagu uu kusoo qaatay tallaalka si uu ula socdo tallaalka kadib adiga ama ilmahaaga. Calaamadaha xasaasiyadda daran waxaa ku jiri kara:

- Neefsashada oo adkaata
- Barar wajiga iyo cunaha ah
- Wadne garaac degdeg ah
- Firiiric ka soo yaaca jirka oo dhan
- Wareer iyo tabar-darro

Bararka wadnaha (bararka muruqa wadnaha) iyo bararka xuubabka wadnaha (bararka xuubka sare ee wadnaha) ayaa ku dhacay dadka qaarkood ee qaateen SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA) ama Tallaalka Moderna COVID-19, wuxuuna ku badan yahay ragga qaangaarka ah

Dib loo eegay: Okt/12/2022

7

ee da'doodu ka yar tahay 40 sanno marka loo barbardhigo dumarka iyo ragga ka weyn. Dadkan intooda badan, astaamuhu waxay ku bilowdaan dhowr maalmood kadib marka la qaato garoojada labaad ee tallaalka. Fursadda ay tani ku dhici karto aad ayey u hoosaysaa. Waa inaad daryeel caafimaad durba raadsataa haddii adiga ama ilmahaaga wax kamid ah calaamadahaan aad isku aragtaan markii tallaalkaan aad qaadataan kadib:

- Xabad xanuun
- Neef-qabasho
- Dareemida inay neeftaadu degdeg tahay, wadnaha oo ruxanaaya ama aad u garaacmaya

Wax dhimaalada lagu soo tebiyay tijaabooyinka caafimaad ee lagu sameeyay tallaaladaan waxaa ku jira:

- Falcelinta goobta durriinka: xanuunka, jilicsanaanta iyo bararka qanjirada ee ku yaala isla cududda la duray, bararka (adkaanta), iyo gaduudasho
- Wax dhimaadlada guud: daal, madax xanuun, murqo xanuun, kala goosyada oo xanuuna, qarqaryo, lallabo iyo mantag, qandho, iyo firiiric

Waxdhimaalada la soo sheegay inta lagu guda jiray oggolaanshaha isticmaalka dambe waxaa ku jira:

- Falcelinada xasaasiyadeed ee daran
- Bararka murqaha wadnaha (bararka muruqa sare wadnaha)
- Bararka xuubabka wadnaha (bararka xuubka sare ee wadnaha)
- Suuxitaanka la xiriira isku duritaanka tallaalka

Waxaa dhici karta inaysan dhicin wax dhimaalada suurtagalka ah dhammaantood ee tallaaladaan. Waxyeello halis ah oo aan la fileyn ayaa dhici karta. Waxyeelooyinka suurtagalka ah ee tallaaladan wali waa la daraaseeyaa.

MAXAAN KA YEELAYAA WAXYEELADIISA?

Haddii xasaasiyad daran aad la kulanto ama ilmahaaga la kulmo, wac 9-1-1, ama aad isbitaalka kuugu dhow.

Wac bixiyaha tallaalka ama bixiyahaaga caafimaadka ama kan ilmahaaga haddii adiga ama ilmahaaga ay soo gaaraan waxyeello wax dhiba ama aanan baxayn.

U soo sheeg wax dhimaalada tallaalka **Nidaamka Soo Tebinta Dhacdada Daran ee Tallaalka ee FDA/CDC (VAERS)**. Lambarka bilaa lacagta lagu waco ee VAERS waa 1-800-822-7967 ama wax kusoo tabi onlayn <https://vaers.hhs.gov/reportevent.html>. Fadlan ku dar midkood “SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA)”, “Tallaalka Moderna ee COVID-19 ee EUA,” ama “Tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent EUA”, sida habboon, ee ku jira safka ugu horreeya ee sanduuqa #18 ee foomka wargelinta.

Intaas waxaa dheer, waxaad ugu soo sheegi kartaa waxdhimaalada shirkadda ModernaTX, Inc lambarka 1-866-MODERNA (1-866-663- 3762).

Waxaa sidoo kale lagu siin karaa xulasho aad isaga diiwaangaliso **v-safe**. **V-safe** waa aalad cusub oo ikhtiyaari ah oo ku saleysan taleefannada casriga ah oo adeegsata farriimaha qoraalka iyo xog-uruurin mareegeed si loola socdo dadka la tallaalay oo loo aqoonsado waxdhimaalada iman kara

Dib loo eegay: Okt/12/2022

8

kadib tallaalka COVID-19. **V-safe** waxay ku weydiin su'aalo kaa caawinaya CDC la socodka badqabka tallaalkada COVID-19. **V-safe** waxay sidoo kale bixisaa xusuusinta garoojada labaad haddii loo baahdo iyo dabagalka taleefanka ee tooska ah ee ay sameyso CDC haddii kaqeybgalayaashu ay soo sheegaan saameyn caafimaad oo weyn kadib talaalka COVID-19. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida la isu diiwaan galiyo, booqo: www.cdc.gov/vsafe.

MAXAA DHACAYA HADDII AAN GO'AANSADO INAANAN QAADAN AMA ILMAHAYGU UUSAN QAADAN SPIKEVAX (TALLAALKA COVID-19, MRNA), TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, AMA TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, BIVALENT?

Sida Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah (EUA) sheegayo, waxa jira ikhtiyaar qofku aqbali karo ama diidi karo qaadashada tallaalka. Haddii aad go'aansato inaad qaadan ama ilmahaagu aanu qaadan wax kamid ah tallaaladan, taasi baddalimayso daryeelka caafimaad ee caadiga ah helistiisa.

MA JIRAAN IKHTIYAARO KALE OO LOOGA HORTAGAYO COVID-19 MARKA LAGA SOO TAGO SPIKEVAX (TALLAALKA COVID-19, MRNA), TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, AMA TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, LA CUSBOONEYSIIYAY?

Wixii tallaalka aasaasiga ah shakhsiyaadka 12 jir iyo ka wayn ah, xulasho kale oo looga hortagayo COVID-19 waa COMIRNATY (Tallaalka COVID-19, mRNA), tallaalka COVID-19 oo FDA ay oggolaadeen. Marka la eego shakhsiyaadka 6 jir iyo ka wayn ah, tallaalka kale oo looga hortago COVID-19 ayaa lagu heli karaa oggolaanshaha Isticmaalka Xaaladda Degdegga ah (EUA), sida tallaalka bivalent kuwaasi oo ay ku jirto qayb Omicron ah oo ah SARS-CoV-2.

ANIGA AMA ILMAHAYGA MA HELI KARAA SPIKEVAX (TALLAALKA COVID-19, MRNA), TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, AMA TALLAALKA MODERNA EE COVID-19, BIVALENT ISLA MARKA AAN HELAYO TALLAALADA KALE?

Xogta weli looma soo gudbin FDA si loo bixiyo SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA), Tallaalka Moderna ee COVID-19, ama Tallaalka Moderna ee COVID-19, La Cusbooneysiiyay isla marka aan helayo tallaalka kale. Haddii aad tixgelinayso inaad la qaadato ama ilmahaagu la qaato SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA), Tallaalka Moderna ee COVID-19, ama Tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent-ka tallaalka kale, kala hadal ikhtiyaaradaada bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ama kan cunugaaga.

KA WARAN HADDII ANIGA, AMA ILMAHAYGA, DIFAACIISU LIITO?

Haddii difaaca jirkaaga ama kan ilmahaagu yahay mid hoos u dhacsan, waxaa laga yaabaa inaad hesho ama ilmahaagu helo garoojada saddexaad ee aasaasiga ah ee tixanaha ee Tallaalka Moderna COVID-19 ama SPIKEVAX (Tallaalka COVID-19, mRNA).

Shakhsiyaadka da'doodu tahay 6 sanno iyo ka weyn waxay heli karaan garoojada xoojinta ah ee Tallaalka Moderna ee COVID-19, Bivalent. Waxaa dhici karta tallaalkadu inayna siin difaac dhammaystiran oo ka dhan ah COVID-19 dadka difaacoogu liito; haddaba, waa in adiga ama ilmahaagu sii wado inuu joogteeyo inuu dadka ka fogaado si uu gacan uga gaysto kahortagga COVID-19. Dadka kuu dhawdhaw waa inay tallaalan yihiin markay habboon tahay.

KA WARAN UURKA AMA NAASNUUJINTA?

Haddii aad uur leedahay ama ilmahaagu leeyahay ama aad ilmo naas nuujiso ama ilmahaagu naas nuujiyo, kala hadal xulashooyinka bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.

MIYAAN TALLAALADAN KA QAADI AMA ILMAHAYGU UU KA QAADI DOONAA COVID-19?

Maya. Tallaaladaan kuma jiro SARS-CoV-2 kamana qaadi kartid ama ilmahaagu kama qaadi karo

COVID-19.


XAFID KAARKA TALLAALKA

Markaad hesho ama ilmahaagu helo tallaalka ugu horreeya ee COVID-19, waxaad heli doontaa kaarka tallaalka. Xasuusnoow inaad la timaado kaarka markaad soo laabanayso.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Haddii aad qabto su'aalo, booqo mareegta ama soo garaac taleefan lambarrada hoos lagu qoray.

Si aad u hesho Xaanshidii Xaqiiqda ee ugu dambaysay, fadlan iskaan garee koodhka QR ee hoos lagu qoray.

| Mareegta Tallaalka Moderna ee COVID-19 | Geli lambarka taleefoonka |
|---|-----------------------------------|
| www.modernatx.com/covid19vaccine-eua  | 1-866-MODERNA (1-866-663-3762) |

SIDEEN INTAAN WAX KA BADAN U OGAAN KARAA?

- Weydii bixiyaha tallaalka
- Ka booqo mareegta CDC barta <https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/index.html>
- Booqo FDA <https://www.fda.gov/emergency-preparedness-and-response/mcm-legal-regulatory-and-policy-framework/emergency-use-authorization>
- La xiriir waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga ama gobolkaaga

XAGEE AYAA XOGTA TALLAALKA LAGU KEYDINAYAA?

Bixiyaha tallaalka ayaa laga yaabaa inuu kusoo daro xogtaada ama xogta ilmahaaga ee tallaalka Nidaamka Xogta Tallaalka ee deegaankaaga/gobolka (IIS) ama nidaam kale oo loo qoondeeyay. Tani waxay xaqiijin doontaa inaad hesho ama ilmahaagu helo isla hal tallaalka markaad usoo laabataan kuurada labaad ee taxanaha aasaasiga ah. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan IISs, booqo:

<https://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/about.html>.

MIYAA LA IGA QAADAYAA KHIDMAD LOOGU TALA MAAMULKA OO LOOGU TALA GALAY QAADASHADA TALLAALADAN COVID-19?

Maya. Waqti xadirkan, bixiyuhu kuguma soo dallici karo khidmadda garoojada tallaalka oo laguguma karo khidmadda hawl-socodsiiinta tallaalka ee jeebkaaga aad ka bixinayso ama khidmad kale haddii uun aad qaadanayso tallaalka COVID-19. Si kastaba ha ahaatee, bixiyeyaasha tallaalka ayaa dooni kara dib u soo celinta habboon ee khidmadaha ku baxay barnaamijka ama qorshaha daboolka khidmadda hawl-socodsiiinta ee loogu talagalay tallaalka COVID-19 ee loogu talagalay dadka qaadanaya tallaalka (caymiska gaarka ah, Medicare, Medicaid, HRSA COVID-19 Barnaamijka Dadka Aan La Caymin ee loogu tala galay dadka qaadanaya tallaalka ee aan la caymiska haysan).

XAGEEN U SOO TEBIN KARAA KIISASKA XATOYADA EE LAGA SHAKIYO?

Dadkii ogaada xadgudubyo dhici kara oo ka dhan ah Barnaamijka Tallaalka ee COVID-19 ee CDC waxaa lagu dhiirigelinayaa inay usoo tebiyaan Xafiiska Baaraha Guud, Waaxda Mareykanka ee Caafimaadka iyo Adeegyada Insaanka ayagoo soo garaacaya 1-800-HHS-TIPS ama TIPS.HHS.GOV.

WAA MAXAY BARNAAMIJKA TALLAABOYINKA LOOGA HORTAGO MAGDHAWGA DHAAWACA?

Dib loo eegay: Okt/12/2022

12

Barnaamijka Tillaabooyinka Ka-hortagga ee Magdhawga Dhaawaca (CICP) waa barnaamij heer federaal ah oo gacan ka geysan kara bixinta qarashka daryeelka caafimaadka iyo qarashyo kale oo gaar ah oo loogu tala galay dad gaar ah oo si halis ah ugu dhaawacmay dawooyin ama tallaalo, ay tallaaladan kujiraan. Guud ahaan, sheegasho waa in loo soo gudbiyo CICP hal (1) sano gudihii laga bilaabo taariikhda maalinta la qaatay tallaalka. Ku socota Si aad wax badan uga ogaato barnaamijkaan, booqo www.hrsa.gov/cicp/ ama soo wac 1-855-266-2427.

WAA MAXAY OGOLAANSHAHA U ISTICMAALKA XAALADDA DEGDEGGA AH (EUA)?

EUA waa qaab lagu fududeeyo helitaanka iyo isticmaalka baddecadaha caafimaad oo ay ku jiraan tallaalada inta ay socdaan xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka dadweynaha sida safmareenka haatan socda ee COVID-19. EUA waxaa taageera ku dhawaaqaida Xoghayaha Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha (HHS) in daruufo jiraan loogu cudurdaarayo isticmaalka degdegga ah ee daawada iyo baddeecooyinka noolaha ah inta uu socdo safmareenka COVID-19. Baddeeco la oggolaaday in si degdegga ah loo isticmaalo ma aysan marin isla nooca dib u eegista ee FDA sameyso sida baddeecadda ay ansixin ka heshay FDA.

FDA waxaa laga yaabaa inay soo saaraan EUA markii shardi gaar ah la waafaqo taasoo ay k ujirto inaysan jirin beddello la heli karo oo ku filan oo la ansixiyay. Intaas waxaa dheer, go'aanka FDA waxaa uu ku salaysan yahay guud ahaanshaha caddeynta sayniska ee la heli karo ee muujinaysa in baddeecadu wax-ku-ool u tahay kahortagga COVID-19 inta uu jiro safmareenka COVID-19 oo faa'iidooyinka la ogsoon yahay iyo suurtagalka ah ee baddeecada ay ka badan yihiin halista la ogsoon yahay iyo suurtagalka ah ee baddeecada. Shardigaas oo dhan waa in la buuxiyo si loo oggolaado baddeecada in la isticmaalo inta uu jiro safmareenka COVID-19.

EUA wuxuu shaqeynayaa inta ay shaqeyneyso caddeynta EUA ee COVID-19 taasi oo u cudurdaareysa isticmaalka degdegga ah ee wax soo saarkan, haddii aanan la joojin ama aanan laga noqon (taasoo intaasi kadib wax soo saarka aanan lasii isticmaali kareyn).

Moderna US, Inc.
Cambridge, MA 02139

©2022 Shirkadda ModernaTX, Inc. Xuquuqaha oo dhan way dhowrsan yihiin.

Bukaanka(bukaanada): www.modernatx.com/patents

Dib loo eegay: Okt/12/2022



Iskaan garee si aad u duubto in Xaashidaan
Xaqiiqda la siiyey qofka tallaalka la siiyay si loo
galiyo diiwaanka caafimaadka ee
elektaroonigga ah/nidaamyada xogta tallaalka.

GDTI: 0886983000349